



THOMAS M. MENINO

**Warbixinta Kooban ee
Guddoomiyaha Waaxda Adeegyada
Kormeerka ee Boston, Massachusetts**

Lambarka: 2008-1

La bixiyay: 5-ta Maarso, 2008

Laga Bilaabo: 12-ka Maarso, 2008

Mawduuca: SHARCIYEYNTA SAGXADAHHA SARE SAQAFYADA

Ujeeddada: Warbixintan kooban ayaa loo soo saaray si loo dejiyo tilmaamo loogu talagalay sharciyeynta sagxadaha sare ee saqafyada si waafaqsan **CBC 9-9.13 Nidaaminta Gelitaanka Aagagga Saqafyadu Ku Yaalaan ee Dhismayaasha Ay Ku Yaalaan Guryaha La Dego**

Go'aaminta:

1. Siyaasadda

Magaalada Boston ayaa soo saartay qaannuun lagu nidaaminayo isticmaalka saqafyada ku yaala aaggaga madadaalada iyo kuwa ku yaala goobaha la isugu yimaado. Qaannuunkan ayaa la sameeyay iyadoo laga fikirayo danta caafimaadka guud, badqabka iyo tayada nololeed ee dadka deggan Magaalada. Si loo hubiyo u-hoggaansamida qaannuunkan siyaasaddan soo socota ayaa la dejiyay waxayna dhaqangeli doontaa 30 maalmood kadib marka la soo saaray:

- 1.1 Dhammaan sagxadaha sare ee saqafyada, ama sagxadaha fidsan ee aan lahayn wax ka dul samaysan ee loo isticmaalo si la mid ah kuwa kale, waxaa loo baahan doonaa in la sharciyeeyo shatii (5) sannaba mar laga bilaabo taariikhda uu dhaqangelayo qaannuunkan.
- 1.2 Waaxda Adeegyada Kormeerka (ISO, Inspectional Services Department) ayaa samayn doonta keyd-xogeed ka kooban diiwaanada sharciyeyntan si loo xaqiijiyo in mulkiileyaasha dhismayaasha ay u-hoggaansan yihiin qaannuunkan.
- 1.3 Inta laga hadlayo ujeedoyinka warbixintan kooban ereyga "saqafka sare ee sagxadda" waxaa ka mid ah saqafka fidsan ee aan lahayn wax ka dul dhisan, balse la geli karo oo loo adeegsan karo ujeedooyin madadaalo (tixraac CBC 9-9.13).

2. Dabaqidda

Qaannuunkan lama dabaqi karo marka ay jiraan duruufaha soo socda:

- 2.1 Guryaha mulkiiluhu deggan yahay ee ay ku nool yihiin hal ama laba qoys (sida uu qeexayo Xeerka Dhismaha ee Gobolka Massachusetts 780 CMR).

- 2.2 Sagxadaha sare ee saqafyada ee la geli karo iyadoo loo marayo hal meel oo laga galo oo ku dhex yaala qolalka mulkiilaha.
- 2.3 Saqafyada aysan geli karin kireysteyaasha ama alaarmiyada leh sida waafaqsan CBC 9-9.13

3. Sagxadaha Sare ee Saqafyada ee Horay u Jiray - Jadwalka U-hoggaansanaanta

- 3.1 Sagxadaha Sare ee Saqafyada ee Horay u Jiray kuwaasoo horay loo oggolaaday iyadoo loo marayo Waaxda Adeegyada Kormeerka waa inay u-hoggaansamaan qaannuunka iyagoo sharciyeynaya ruqsadaha dhismooyinka (eeg qeybta 4.4 ee hoose) ugu dambeyn taariikhaha soo socda ee muhiimka ah:

DEGMADA

1, 3, 5, 7, 9

2, 4, 6, 8, 10

11 ilaa 15

16 ilaa 22

TAARIIKHDA SHARCIYEYNTA

30-ka Juun, 2009

30-ka Juun, 2010

30-ka Juun, 2011


30-ka Juun, 2012

- 3.2 Marka sagxadaha sare ee saqafka la dhammeystiro in la sharciyeeyo iyo/ama laga diiwaangeliyo Waaxda Adeegyada Kormeerka (ISD, Inspectional Services Department) sagxadda sare ee saqafka waa in dib loogu sharciyeeyo sida la iska rabo ee ku jirta qeybta 4.4 ee hoose shantii (5) sannaba mar.
4. Sagxadaha Sare ee Saqafyada ee Cusub, Beddelka ah ama La Dayactiray
- 4.1 Codsiyada loogu talagalay sagxadaha sare ee saqafyada ee cusub ama sagxadaha sare ee saqafyada ee beddelka ama dayactirka ku socdo ee loogu talagalay aaggaga sagxadaha ee aan lahayn wax ka duldhisan ee loogu talagalay in loo adeegsado ujeedooyin madadaalo waa in loogu gudbiyo Adeegyada Kormeerka (ISD, Inspectional Services Department) ruqsadda dhismo dheer ahaan.
- 4.2 Codsiga waa inay la socdaan qorsheyaal uu shaabadeeyay/tiimbareeyay naqshadeeye ama injineer ka diiwaangashan Commonwealth of Massachusetts waana in lagu muujiyo u-hoggaansanaanta shuruudaha Xeerka Dhismaha Gobolka iyo Xeerka Xakameeya Dhismeyaasha Magaalada Boston.
- 4.3 Caddaynta shuruudaha kale sida BRA iyo/ama ansixinada Guddiga Asteynta Dhulalka waa in sidoo kale lala soo gudbiyo codsiga ama la soo gudbiyaa kahor inta aan ruqsadda la bixinin.
- 4.4 Marka la gaaro dhammaadka mashruuca mulkiiluhu waa inuu soo gudbiyo warqadda qiraalka ee laga helay naqshadeeyaha ama injineerka ee caddaynaysa in sagxadda sare ee saqafka ay u-hoggaansanayd qawaaniinta lagu dabaqi karay xilligii la bixinayay ruqsadda asalka ah.
- 4.4.1 Sharciyeyntani waxay dabooli doontaa dhammaan arrimaha la xiriira badqabka guud oo ay ku jiraan shuruudaha culeyska dhismuhu qaadi karo, shuruudaha biraha la cuskado (dhererka, shamiindaynta culeysyada tiirarka qaadi karaan, iwm.) shuruudaha gelitaanka iyo ka bixitaanka.
5. Sagxadaha Sare ee Saqafyada Badan
Dhismeyaasha leh sagxadaha sare ee saqafyada badan ha ku yaalaan ama yaysan ku oolin goob guud waa inay lahaadaan sagxadaha sare ee saqafyada ama aaggaga la mid ah oo ay sharciyeysan sida ku cad isla warqadda qiraalka ah haddii la dabbaqi karo.

Waxaa saxiixay:



William J. Good, III
Guddoomiyaha
Waaxda Adeegyada Kormeerka



Gary P. Moria
Kormeeraha Dhismeyaasha
Waaxda Adeegyada Kormeerka